



SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT
Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

Xafiiska Maamulaha Guud

Abriil 9, 2020

Qoysaska Qaaliga ahoow,

Sidaan horay usoo sheegay todobaadkan, Gudigga Imtaxaanka Dugsiga Sare ee New York (New York State Board of Regents) iyo Waaxda Waxbarashadda ee Gobalka ayaa ku dhawaaqay joojinta Imtaxaanada Dugsiga Sare ee Juun 2020. Waxaan hadda haynaa tilmaan dheeraad ah si aan adiinla wadaago oo la xidhiidha waxa ay tanu ardayda uga dhigan tahay.

Waaxda Waxbarashadda ee New York (New York State Department of Education) ayaa wax ka badashay shuruudaha si markaas dhammaan ardayda hadda ka qoran fasalada 7-12, ayna ku jiraan ardayda fasalka ugu danbeeya dugsiga sare, ee doonaayay inay ka qayb galaan imtaxaan Dugsiga sare bishan Juun ayaa xaq u leh ka dhaafida imtaxaanaadaas.

Ardayda ayaa heli doona buundada ku aadan Diplomada NYS ayagoon u fariisan imtaxaan, waxaana laga reebayaa inay qaataan, imtaxaanka Qalin jabiyaasha ayadoo la marsiinaayo shuruudaha soo socda:

- Ardaydu waxa uu hadda ka diiwaan gashan yahay koorsada heerka Imtaxaanka ama uu horay uga qornaa koorsada.
- Ardaygu wuu gudbaya ama waxa uu gudbayaa koorsada heerka Imtaxaanka dugsiga sare sanadkan oo waxa uu helayaa buundada koorsada.
- In Ardaygu doonaayay qaadashada Imtaxaanka Dugsiga sare ee koorsada bishan Juun.
- In ardaygu uu ka qornaa Koorsada heerka Imtaxaanka, uu ku fashilmay helitaanka buundada koorsada, uuna doonaayo inuu qaato casharada dugsiga xagaaga uuna gudbo koorsada buundada ee Agoosto 2020.

Waxaa sidoo kale doonaayay inaan idiin sheego inaan soo gabagabaynayno shuruudaha buundo bixinta ee xiliga sixitaanka rubaca 4^{aad}. Waxaan idin la wadaagi doonaa xog dheeraad ah sida ugu dhakhsaha badan marka tan caadiga laga dhigaayo, Ardayda u baahan kara waqti dheeraad ah si ay ku buuxshaan kuna gudbiyaan shaqadooda, macalimiinta ayaa galin kara calaamada Imcomplete (I) (Ma dhamaystirna) si loo siiyo waqti dheeraad ah ardayda si ay u dhameeyaan shaqada waqtiyadan adag.

Waxaan idiin ka mahad naqayaa fahankiina joogtada ah iyo taageerada anagoo samaynayna waxaan awoodno si aan xog idiinka siino duruufahan isbeddelaya.

Fadlan dhawra badbaadadiina,

Jaime Alicea
Maamulaha Guud ee Dugsiyada